spl.org




## Booqashada Khadka Talefoonka ah

Si aad wax badan uga ogaato Maktabada Dhexe "Central Library", wac 206-686-8564 oo gali lambarka (1-20) ee ku qoran calaamadda joogsiga safarka ee taleefanka gacanta, ee ay ku xigto #. Joogsiyada booqashada ee heer kasta waxay ku qoran yihiin gadaal.

Ka eeg farshaxanka:
**www.spl.org/CentralArt**

# The Central Library

spl.org

Booqasho Leh Hagitaan Shakhsi ahaaneed oo Loogu Talagalay Caruurta | Farshaxanka, goobaha sawir-qaadashada iyo waxyaabo kale oo fiican

**Xaqiiqooyin kooban oo ku saabsan Central Library**

- Waxaa la furay marka taariikhdu ahayd Maayo 23, 2004
- Waxaa naqshadeeyay naqshadeeyayaasha caanka ka ah aduunka ee Rem Koolhaas iyo Joshua Prince-Ramus
- Wuxuu leeyahay 11 dabaq oo ka kooban 363,000 fiit oo laba jibaaran oo leh ku dhawaad 10,000 daaqadood
- Kani waa dhismihii sadexaad ee Central Library ee ka jira qaybtan - kii ugu horreeyay waxaa la dhisay 1906

**Dabaqa 1** waxay qeybta Ururinta Luuqadaha Aduunka oo ka kooban agab ku qoran luuqado kala duwan.
- Fiiri sagxada - waxaad ku socotaa shaqo farshaxan ah (ha walwelin, waxaa loogu talagalay in lagu socdo).
- Ma haysatid kaarka Maktabada Soo ma aha? Halkan mid ka hel! La hadal shaqaalahayaga way ka caawin karaan.
- Eeg waxa ka dhacaya masraxa. Waxaan martigalinaa hadal jeedinada qoraaga, daawashada filimada iyo wax kale oo badan.

**Dabaqa 3** waa goobta ay booqan karto Xarunta Dhalinta (Teen Center) – adiga ayaa laguugu talagalay!
- La hadal Shaqaalaha Maktabadda ee Dhalinyarada, isticmaal kombayutarada ama joog goobta la fariisto.
- Dabaqan wuxuu leeyahay Farshaxan Khayaali ah, iyo DVD-yo badan - oo lagu daray sheeko garaafyo ah iyo manga.
- Soo hel sawir-gacmeedka biyaha hoostooda ee qarsoon oo soo dhig **#SPLselfie**.

**Dabaqa 4** waa Dabaqa Cas; runtii, runtii waa casaan (waana meesha ay dadku ku qabsan karaan qolalka shirarka ee munaasabadaha gaarka ah).
- Waxaa jira 13 midab oo rinji cas ah oo ku yaal gidaarada, saqafka, sagxadaha iyo jaranjarooyinka.

**Dabaqa 5** waa Goobta Isku-dhaf ah, halkaas oo aad isticmaali karto kombiyuutarada, daabacayaasha, iskaanada iyo wax kale oo badan.
- Ka eeg shaashadaha miiska dushiisa ah? Farshaxanka dhijitaalka ah ayaa soo bandhigaya macluumaadka wakhtiga dhabta ah ee ku saabsan waxyaabaha ay macaamiishu hubinayaan.

**Dabaqa 6** waa bilawga Qeybta Buugaagta, halkaas oo aad ka heli karto ururintayada khayaaliga ah.
- Dabaqan waxaa kale oo uu hoy u tahay ururinteena badan ee wargeysyada iyo majaladaha.

**Dabaqa 7** waa hoyga Qolka Zine ZAPP.
- Balanso si aad u aragto ururintayada 30,000+ daabacaada.
- Soo dhig sawirka **#SPLselfie** hortiisa sawirka Qolka Daabacaada ama muraayadayada qarsoon ee meel banaan.
- Ma raadinaysaa shaqo? Booqo Xarunta Kheyraadka Shaqada, waxay kaa caawin karaan qorista warqadaada shaqo iyo aqoonta.

**Dabaqa 8** waa meesha aad ku arki karto bandhigyo ay ku jiraan fanaaniinta deegaanka.
- Ma maqashaa gitaarka ama hees? Taasi (malaha) waxay ka imanaysaa Qolalka Muusiga. U balanso mid kooxdaada fanaaniinta ah!

**Dabaqa 9** waa halka aad ka heli doonto Qolka Khariirada iyo Ururinta Khariidadayada.
- Waxaan haynaa khariidadaha Beeraha Nasashada Qaranka, wadooyinka maxaliga ah iyo wax kaloo badan.
- Haddii aad danaynayso inaad barato taariikhda qoyskaaga, waxaad la shaqayn kartaa maktabadaha Asal abtirsiimada si aad u baarto halka aad ka soo jeeda.

**Dabaqa 10** waxa uu leeyahay aragtida ugu saraysa, halkaas oo aad ka eegi karto ilaa Dabaqa 3.
- Balanso Qolka Seattle si aad u aragto ururintayada gaarka ah, oo ay ku jiraan buugaagta dugsiga sare ee magaalada oo dhan.
- Qaado hal daqiiqo oo aad ku nasato qolka Akhriska. Kadib markaad booqato dhamaan Central Library, waad heshay!
- Markaad soo dhigto sawiradaada, isticmaal haashtag **#SPLselfie** oo nagu lifaaq Instagram **@seattlepubliclibrary**.